



BISMILLAHI RAXMAANI RAXIIM

UJEED: CAMAARAYN KU WAJAHAN WEERARKA LAGU QAADAY
XILDHIBAANADA BEESHA DIR EE DAWLADA GOBOLEEDKA HIIRESHABEELE.

Ku: Madaxweynaha Dawlada Federaalka Somaliya Maxamed Cabdullahi Farmaajo
Ku: Raiisal Wasaaraha Dawlada Federaalka Somaliya Maxamed Xuseen Rooble
Ku: Madaxweynaha Hirshabelle Cali Cabdullahi Xuseen
Ku: Beesha Caalamka iyo Hayadaha Xuquuqal-Insaanka
Ku: Saxaafada Geeska Afrika iyo guud ahaan Saxaafada Caalamka

Golaha iyo Ururka Midnimada Direed (UMD) oo ah Urur iyo ku bahoobeen dhamaan afarta beellood ee beelweynta direed, Madoobe Dir, Madaluuq Dir, Madaxweyne Dir iyo Maha Dir wuxuu si mug iyo miisaan leh u cambaaraynaya weerarkii daraad oo ay taariikhdu ahayd 3 september 2021 lagu qaaday xildhibaanada beelaha Dir ugu jira Dawlad Goboleedka Hiireshabeela.

Beelweynta direed waxay si weyn uga xuntahay weerarka iyo dagaalka joogtada ah ee lagu hayo beelaha Dir ee dega HIIRESHABEELA oo uu udanbayey weerakaas xildhibaanadu.

Sidoo kale Ururka Midnimada Direed (UMD) Waxa uu ka dalbanayaa xukuumada Federaalka ah ee Somalia iyo Dawlada Goboleedka Hiireshabeela inay si dhakhso loo horkeeno cadaalada cidii ka danbaysay weerarka xildhibaanada.

Ururka Midnimada Direed (UMD) waxa kale oo ka codsanayaa Xukumada Federaalka ah iyo ta Hiireshabeeleba in gargaar caafimaad oo degdeg ah loo fidiyo xildhibaanada dhawacu ka soo gaadhay weerakaas waxashnimada ah.

Xildhibaanada dhaawacmayna waxaanu ilaahay uga baryayaa caafimaad dedeg ah.

Stockholm Sweden
Ibrahim Ali Adan
Gudoomiyaha Ururka Midnimada Direed (UMD)